

Xarunta Bukaanka Kansarka Fred Hutchinson Xeerka Kaalmada Maaliyada  
Lifaaqa II – Heerka Qiimaynta ee Kala sareynta Abaal marinta Kaalmada Maaliyada

Si waafaqsan WAC 246-453-040, tirada qoyska ee Codsadaha iyo dakhliga dib ayaa loo eegi doonaa waxaana la go'aamin doonaa Boqolkiiba inta ay tahay Heerka Saboolnimada Federaalka (Percentage of Federal Poverty Level, FPL), boqolkiiba inta ay tahay waxay go'aamin doontaa heerka kaalmada maaliyada si loogu abaal mariyo iyaddoo lagu salaynayo taariikhda adeega. Codsadayaasha (bukaanada iyo dadka damaanad qaaday) waxay u qalmi doonaan kaalmada maaliyada ee qaybta ka masuulka ah bukaanka ee ah kharashyada isbitaalka la mid ah hadhaaga lacagta aan la bixin ka dib marka dhammaan ilaha daboolida kooxda saddexaad iyo kafiiladu ay dhammaadaan.

Daryeelka caafimaad ahaan lama huraanka ah ka hor Juulay 1, 2022, Xarunta Kansarka Fred Hutchinson waxay ka fekeri doontaa Kaalmada Maaliyada iyo daryeelka deeqda ah ee bukaanka ee waafaqsan xeerkan, marka daboolida caymiska kooxda saddexaad, haddii ay wax jiraan, ay dhammaato, iyaddoo ku salaysan heerka qiimaynta soo socda iyo go'aankuna waxa uu ku salaysnaan doonaa dakhligooda lagu habbeeyay inta qoysku leeg yahay, qadarada soo socda:

- Dakhligu kama badna 300% ee FPL, waxay u qalmi doontaa kaalmada maaliyada oo ah qadarka buuxda (100%).

Daryeelka caafimaad ahaan lama huraanka ah ee la helo taariikhda ama ka dib Juulay 1, 2022, Xarunta Kansarka Fred Hutchinson waxay ka fekeri doontaa kaalmada maaliyada iyo daryeelka deeqda ah ee bukaanka ee waafaqsan xeerkan, marka daboolida kooxda saddexaad, haddii ay wax jiraan, ay dhammaato, iyaddoo ku salaysan heerka qiimaynta soo socda iyo go'aankuna waxa uu ku salaysnaan doonaa dakhligooda lagu habbeeyay inta qoysku leeg yahay sida lagu qeexay RCW 70.170;

- Dakhligu kama badna 300% ee FPL, waxay u qalmi doontaa kaalmada maaliyada oo ah qadarka buuxda (100%).
- Dakhliga u dhexeeya 301% iyo 350% ee FPL, waxay u qalmi doonaan kaalmada maaliyada oo ah lacag dhimista 75%.
- Dakhliga u dhexeeya 351% iyo 400% ee FPL, waxay u qalmi doonaan kaalmada maaliyada oo ah lacag dhimista 50%.